

3 BILOOD EE UGU HORAYSA

KACAAWI CUNUGAAGA BARASHADA
CUNTO CUNISTA CAAFIMAADKA LEH



Caanaha biniaadamka ayaa ah cuntada ugu fiican ee ilmuhu cunaan. Caanaha biniaadamka ayaa ilmaha siiya nafaqooyinka uu ubaahanyahay waxayna sugaan fayadhawrka cunugaaga. Waxaa habiin inaad naaska/xabadka nuujiso ilaa cunugaagu gaaro ugu yaraan 1 sano jir. Hadaadan cunugaaga siin siin caanaha biniaadamka, cuntooyinka dhuuxa lagu daray aya ah dookha labaad ee ad qaadan karto.

ILA CABITAAN INTEE LE'EG AYAYA TAHAY IN CUNUGAAGU CABO? UDA ILMAHA HA GO'AANSADDEE!

Ilmuhu wuxuu baranayaa inuu wax cuno marka uu gaajeysan yahay iyo inuu iska dhaafo marka uu dhargo. Ilmaha ayaa leh calool aad uyar, marka waa inay si joogto ah wax ucunaan.

- Ilmaha waxay wax cunaan 8 ilaa 12 jeer ama kabadan muddo 24 saac ah (maalin iyo habayn).
- Caruurta cuntooyinka caruurta lasiiyo ayaa cna 1-2 ounces oo cunto ah halkii marba intay kujiraan bisha koobaad ee noloshooda. Cadadkaan ayaa gaara kudhawaad 2-3 ounces markiiba intuu kujiro ilmuhu bisha labaad.
- Caanaha biniaadamka ama foormulada ayaa ah kaliya waxa ilmuhu ubaahanyahay ilaa uu kagaaro 6 bilood.





Cunugaaga ayaa baahi hayn kartaa haddii uu:

- Faraha gelinaayo afka
- Soo godaayo gacmaha iyo lugaha
- Sameynaayo codad sida inuu wax cunaayo
- Nuugaayo faruuryaha
- Naasaha raadiyo

Cunugaaga ayaa dhargay haddii uu:

- Si tartiib ah u nuugo ama joojiyo nuugista naaska
- Nasiyo gacmaha iyo garbaha
- Ka jeesto ibta naaska
- Ku riixo
- Seexdo

Daawo astaamaha gaajada iyo dharagta ee cunugaaga hana kafilan in ilmuhu dhalo buuxda dhamaysto.

Ogsoonow boohintu kama dhigna inu gaajaysan yahay; ilmaha ayaa ubooya sababo badan. Hubi sababta ilmuhu ubooyaayo. Miyuu kaadshay, miyuu dareemay kuleel badan ama qaboow ama miyuu daalay?

XILIGA QUUDINTA ILMUHU WAA XILIGA ISKUXIRNAANTA WALIDKA IYO ILMAHA

Qabo ilmahaaga intaad quudinayso. Tani waa waqti qaas u ah hooyada iyo cunuga. Kafagoow kuqsbida masaasada madaama ay keeni karto inuu saxdo, ayna keeni karto inuu cuntada iskabadiyo.

MASAASADA XILIGA JIISKA?

Waa qayb caadi ah oo kamid ah kobaca caafimaadka leh ee ilmaha inay toosaan habaynkii kadubna ay seexdaan muddo kooban maalintii. Cunugaaga sariirta kuseexi bilaa masaasad. Ilmuhu wuxuu baranayaa sida uu ugam'o asagoon masaasad afka loogalin.

